

Cascade Care Savings oo Cusub ayaa La Heli Karaa 2023

In ka badan 40% ee reer Washington ee helay caymiskooda caafimaadka iyaga oo u adeegsanaya goobta suuqa barta internet-ka ee rasmiga ah ee gobolka, *Washington Healthplanfinder*, ayaa waxay heli karaan kaalmooyinka lacagta joogtada ah ee caymiska ee ay dowladdu maalgeliso oo cusub marka la isku qorayo caymiska 2023.

Si loo helo keydadkan cusub — ee loo yaqaanno Cascade Care Savings — macaamiisha *Washington Healthplanfinder* waxay si cusub isugu qori karaan, ama ugu wareegi karaan, qorshe u-qalma inta lagu guda jiro isqoritaanka furan laga bilaabo 1-da Nof.



Cidda

Cascade Care Savings, ee la heli karo iyadoo si gaar ah loo marayo *Washington Healthplanfinder*, waxaa loogu talagalay dadka reer Washington oo ka kooban ilaa 250% ee heerka saboolnimada federaalka (FPL) — guud ahaan shaqaalaha mushaarkoodu hooseeyo iyo kuwa qayb ahaan shaqeeya – kuwaas oo aan xaq u lahayn barnaamijyada caymiska federaalka iyo kuwa dowladda ee jira sida Washington Apple Health ama Medicare.

Talo: Si ay u arkaan heerkooda saboolnimada federaalka – [macaamiisha waxay isticmaali karaan aaladdan wax lagu xisaabiyo](#)

Waa maxay

Macaamiisha inta badan xaq u leh Cascade Care Savings waxay awoodi doonnaan in ay helaan qorshaha Cascade Care oo ay tayadiisu sarreyso iyada oo la bixinayo in ka yar \$10 bishii. Iyo, markii ugu horreysay taariikhda *Washington Healthplanfinder*, ayaa macaamiisha waxay heli karaan qorsheyaal leh lacagaha joogtada ah ee caymiska oo leh \$0 bishii.

Qorshayaasha Cascade Care waxay leeyihiin waxyaabaha laga jari karo oo yar waxayna si aad ah u caymiyaan adeegyada ka hor waxyaabaha laga jari karo, oo ay ku jiraan booqashooyinka daryeelka aasaasiga ah, iyo daawooyinka guud ee la isu qoro.

Goormee

Macaamiisha aanan horey ugu qorneyn qorshaha Qalinka (Silver) ama Dahabiga (Gold) ee Cascade Care waxay u baahan doonnaan in ay si cusub isugu qoraan, ama u beddeshaan, qorshaha Qalinka (Silver) ama Dahabiga (Gold) ee Cascade Care xilliga isqoritaanka-furan (1 Nof., 2022–15 Jan., 2023). Macaamiisha isku qora marka ay taariikhdu tahay 15-ka Dis., 2022 waxay bilaabi doonnaan in ay helaan Cascade Care Savings 1 Jan., 2023.

Talo: Qorshayaasha Cascade Care waxaa “Cascade” kaga yaala labadaba magaca qorshaha iyo astaanta Cascade Care waxaanna lagu muujiyaa meel u dhow shirkada qorshaha ee ku jirta *Washington Healthplanfinder*.

Kumaa xaq u leh keydka Cascade Care Savings?

- ▶ Dakhliga reerka oo gaaraya 250% ee heerka saboolnimada federaalka
- ▶ Codso oo aqbal dhammaan deymaha canshuurta federaalka ee la heli karo
- ▶ Aan xaq u lahayn caymiska aasaasiga ah ee ugu yar ee loo marayo barnaamijyada federaalka ama gobolka, sida Medicare ama Washington Apple Health
- ▶ Ku qoran qorshaha Cascade Care ee Qalinka (Silver) ama Dahabiga (Gold) ah ee loo marayo *Washington Healthplanfinder*
- ▶ Degganaha gobolka Washington ee xaq u leh qorshaha Qualified health plan (QHP)
- ▶ Shakhsiyaadka Hindida Mareykanka/Dadka Asal Ahaan u dhashay Alaska waxay isku qori karaan qorshe kasta ee u oggolaanaya in ay ka faa'iideystaan dheeftooda dhimista kharash-wadaagga ee \$0.

Halka

Macaamiishu waxay isku qori karaan Cascade Care Savings iyaga oo booqanaya **wahealthplanfinder.org** ama ka wacaya Xarunta Taageerada Macmiilka **1-855-923-4633**. Xaq-u-yeelashada waxaa go'aamiya *Washington Healthplanfinder* waxaanna kayd cusub la codsan doonnaa marka caymiska 2023 ee macmiilka uu bilowdo.

Sidee

Cascade Care Savings waxaa sameeyay Laanta Sharci-dejinta Gobolka Washington sannadkii 2023, waxaanna \$50 milyan loo diyaariyey sannadka 2023.

Cascade Care Savings wuxuu badinayaa dhammaan amaahyada canshuurta federaalka ee la heli karo, wuxuunna sidoo kale caawinayaa macaamiisha aan xaq u lahayn kaalmooyinka federaalka. Kaalmooyinka lacagta joogtada ah ee caymiska ee gobolka, marka la barbardhigo kaalmooyinka federaalka, ayaa waxay bixiyaan fursad aan horey loo arag oo loogu talagalay dadka aan caymisneyn, dadka deggan Washington ee dakhligooda hoose si loo caymiyo.

Qaddarka saxda ah ee keydka la helay wuxuu ku saleysan yahay nolosha macmiilka, da'dooda iyo dakhligooda, waxaanna loo soo bandhigi doonnaa macaamiisha *Washington Healthplanfinder*. Sannadka 2023, Cascade Care Savings wuxuu lacagaha caymiska joogtada ah ka yareyn doonnaa ilaa \$155 xubin kasta bil kasta.

**Qiimaha keydka Cascade Care Savings
(Maria, oo 40 jir ah, ayaa ku nool Federal Way dakhligooda sannadlahana waa \$30,578.)**



Haddii Maria ay si otomaatiga ah isugu qorto isla qorshaha sannadka xiga, kaas oo aan xaq u lahayn keydka Cascade Care Savings, waxay bixin doontaa ku dhowaad \$60 oo dheeraad ah bil kasta marka loo eego sida ay sameysay sannadkii 2022.



Haddii ay u beddelato qorshaha Cascade Care laakiinse ay dooneyso in ay la joogto isla shirkadeeda, waxay dhaqaaleysan kartaa ku dhowaad kala-bar lacagaheeda joogtada ah ee bil kasta.



Marka ay u beddelato Cascade Care ee kharashkiisu yar yahay Qorshaha qalinka(silver) ee degaankeeda, ma bixinayso lacagaha joogtada ah ee bil kasta ee isla dheefaha tayadoodu sarreyso.

Nooca qorshaha	Shirkadda aan ahayn Cascade Bronze		Cascade Silver; shirkadda hadda	Cascade Silver; u beddelo shirkadda ugu kharashka yar
	2022	2023	2023	2023
Sannadka qorshaha	2022	2023	2023	2023
Lacagaha caymiska ee joogtada ah	\$387	\$437	\$433	\$358
Canshuur Dhaafka Lacagta Joogtada ah ee Caymiska ee Horumarsan	\$297	\$290	\$290	\$290
Cascade Care Savings	N/A	N/A	\$68	\$68
Lacagta Joogtada ah ee Caymiska ee Saafiga ah	\$90	\$147	\$75	\$0